

Hay'adda Guryaha iyo Dib u  
horumarinta ee Bloomington (HRA)

Sideen u  
codsan  
karaa?

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad  
ah ama codsiga, soo booqo

[www.ci.bloomington.mn.us](http://www.ci.bloomington.mn.us),

erayga aad ku raadineyso: FHIP

ama la soo xiriir


**Bloomington HRA**

1800 W. Old Shakopee Road  
Bloomington MN 55431-3027

**952-563-8937**

**TTY: 952-563-8740**

**Dhulka loo qoondeeyay FHIP**



Si aad xaq ugu yeelato taageerada FHIP, hantida ma guurtada ah waa in ay ku taalaa dhulka loo qoondeeyay ee Bloomington, fiiri *khariidada kore*. Dhamaan codsiyada FHIP waa in ay yihiin kuwo lagu iibsaday ama lagu iibsanayo guryo xaraash ah ee ku yaal dhulka loo qoondeeyay ee 12kii bilood ee la soo dhaafay.

*Hay'adda Guryaha iyo Dib u Habaynta ee Magaalada Bloomington (HRA) ma samayso midab kala sooc ku dhisan qowmiyadda, midabka, jinsiga, halka uu ka soo jeedo, da'da, ama naafanimada si loogu ogolaado ama ay ogolaasho ugu helaan ama ula dhaqmaan shaqaalaha, adeegyada ay bixiso, barnaamijyada, ama dhaqdhaqaaqyada kale. Marka ay codsadaan dadka naafada ah, waxaa loo fidinayaa waxyaabaha ay u baahan yihiin si ay uga faa'iideystaan adeegyada HRA, barnaamijyada iyo dhaqdhaqaaqyada kale. Haddii ay codsadaan macluumaadka waxa ay ku heli karaan habka fart a la xardho, la waaweyneeyo, cajalad ama kombiyuutar lagu duubo.*



**BARNAAMIJKA DIB U  
HABAYNTA GURYAHA  
LA XARAASHAY(FHIP)**

***Dhisitaanka Bloomington  
Wanaagsan***



**Barnaamijkan waxaa iska  
kaashaday magaalada  
Bloomington HRA, Degmada  
Hennepin iyo Waaxda  
Guriyeynta iyo Horumarinta  
ee Mareykanka.**

## Waa maxay FHIP?

**Barnaamijka dib u habaynta guryaha xaraashka ah (FHIP)** waa mid loogu talo galay dadka guryaha ku noolaanaya ee u baahan in ay dib u habayn ku sameeyaan. Codsiyada oo dhan waa in ay noqdaan kuwo guryaha xaraashka lagu iibsaday 12kii bilood ee u dambaysay. Hantida xaqa u yeelanaysa waa in ay ku taalaa dhuka loo qoondeeyey ee Bloomington, *fiiri khariidadda la socota*. Qiimaha guriga ka dib marka dib u habaynta lagu sameeyay sida uu go'aamiyey qiimaha guryaha magaalada waa inuusan ka badnaan \$276,683.00.

## Lacag intee le'eg ayaan amaahan karaa waa maxayse mudada la ii qabanayo?

**Lacagta ugu badan ee aad amaahan karto sida ay go'aamiyeen waa \$20,000**

**Kala bar lacagta daynta ah** lama bixinayo haddii deyn qaatuhu guriga ku noolaado 5 sano. Inta soo harta waxaa dulsaar 5 boqolkiiba ah muddo 10 sano ah looma baahna in la bixiyo ilaa mulkiiluhu iibiyo guriga ama gurigu uusan ahayn halka uu ku nool yahay mulkiilaha.



## Waa maxay dvib u habayna loo isticmaali karo?

### Dib u habaynta la ogol yahay

#### waxaa ka mid ah:

- Dayactirka la xiriira caafimaadka iyo nabadgalyada
- Dayactirka la xiriira korontada, kuleylka iyo tubooyinka.
- Dayactirka la xiriira beekhaaminta tamarta.
- Dayactirka dibadda guriga sida dhinacyada, saqafka, majaroorka, iyo biyo dhaca, daaqadaha, garaashka hortiisa, aasaaska.



\* dayactirka looga baahan yahay guryaha la dhisay ka hor 1978.

## Waa maxay dib u habaynta aan loo isticmaali karin?

### Dib u habaynta aan loo ogolayn waxaa ka mid ah:

- Shaqo socota ama la dhamaystira daynta ka hor.
- Alaabta guryaha ee iskeed u istaagaya.
- Waxyaabaha lagu madadaasho sida godka dabaasha, meelaha la harsado, biyaha kulul ee dabaasha, balakoonaha iyo shiraaca qoraxda.



## Haddii aan doonayo in aan iibsado guri xaraash ah sidee ayaan ku ogaanayaa in aan xaqa u leeyahay?


Haddii aad iibsatay guri xaraash ah 12kii bilood ee la soo dhaafay ama aad la shaqaynayso qof guryaha gada si aad u iibsato guri xaraasha ah, waxa aad codsan kartaa in aad la tashato HRA si aad u ogaato in aad xaqa u leedahay deynta FHIP. La



tashaigu waa mid lacag la'aan ah waajibna kuguma aha in aad ka qeyb qaadato. Si aad u codsato la tashigan la soo xiriir oo kaliya HRA oo kala soo xiriir telefoonka 952-563-8939.

Wixii macluumaad dheeraad ah, soo booqo [www.ci.bloomington.mn.us](http://www.ci.bloomington.mn.us), erayga aad ku baarayso: FHIP.

## Maxay tahay xuduudda dakhliga soo gala qofka ee loo ogol yahay deynta dib u habaynta guryaha uu qofkii lahaa deggan yahay ?



XUDUUDDA DAKHLIGA CANSHUURTA KA HOR

\* Waxa ay ku salaysan tahay dakhliga canshuurta ka hor ee soo gala dhamaan xubnaha qoyska oo lagu daray 2 boqolkiiba dhamaan hantida. Xadka dakhliga waa mid la bedeli karo.

\*\*Dhamaan dadka ku noolaanaya, oo ay ku jiraan kuwo kireysanaya oo qaraabada la ah ama aan la ahayn iyo kuwo u hoyanaya..